



## Diiradda la saarayo: Baahiyaha bulshada ee caafimaadka la xiriira

**CareOregon** waxay aaminsan tahay in daryeelka caafimaadku wax ka qabto baahiyaha caafimaad ee gaarka ah, laga soo bilaabo nafaqada ilaa helitaanka guryaha iyo wixii ka dambeeyaa. Laga bilaabo Maarsa 2024 oo soconaya ilaa 2025, xubnaha u qalmaa waxay heli karaan faa'iidooyinka baahiyaha bulshada ee caafimaadka la xiriira (HSRN):



### Qalabka cimilada oo loogu talagalay baahiyaha caafimaad

*La heli karo Maarsa 2024*

#### Tusaalooyinka:

- Qaboojiyayaasha hawada/ qalabka wax diiriya
- Qalabka sifeynta hawada



### Adeegyada guryaha

*La heli karo Noofambar 2024\**

#### Tusaalooyinka:

- Taageerida noqoshada ijaarte iyo nidaamka guryaha
  - Adeegyo gacan ka geysanaya sii haysashada adeegyada ‘utilities’



### Adeegyada nafaqada

*La heli karo Janaayo 2025\**

#### Tusaalooyinka:

- Cuntooyin gaar ah oo loogu talagalay baahiyaha caafimaad
- Miro iyo khudaar la isku qoro

\* Taariikhuhu way isbeddeli karaan, iyada oo ku saleysan tilmaamaha OHA.

## Ma u qalmaa?

Faa'iidada HRSN waxaa heli kara xubnaha u qalma kala guurka nolosha iyo baahida caafimaad. Kala guurka noloshu waxaa ka mid noqon kara waxyabaha sida in lagu lug yeesho nidaamka daryeelka carruurta, in khatar loogu jiro hoy la'aan, ama in la iska sii daayo jeelka. Baahi caafimaad waxaa ka mid noqon kara uur lahaanshaha, lahaanshaha baahida caafimaadka jireed oo adag, ama isticmaalka soo noqnoqda ee adeegyada dhibaatooyinka.

Si aad u ogaato haddii aad u qalanto, Adeega Macmiilka ee CareOregon ka wac **800-224-4840** ama **TTY 711**, ama farriin ammaan ah noogu soo dir [careoregon.org/portal](http://careoregon.org/portal)

## Wax ka ogow CareOregon

**Waxaad leedahay faa'iidooyinka baahiyaha bulshada ee caafimaadka la xiriira oo la adeegsanayo CareOregon.**  
**Halkan ka ogow waxyaabo badan oo nagu saabsan.**

Marka ay dadku ka hadlaan Medicaid ka jirta Oregon, waxaa dhici karta in aad maqasho iyaga oo dhahaya magacyo iyo warqado badan oo kala duwan. Sababtu waa in ay jiraan ururo badan oo ku lug leh xaqijinta in aad hesho daryeelka aad u qalanto. Sidee baad macne ugu yeeli kartaa haba yaraatee?

### **Waxay gacan ka geysataa in aad uga fikirto Medicaid ka jirta Oregon in ay tahay sida qaabka pyramid oo kale.**

**Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHA)** ayaa gacanta ku haya barnaamijka Medicaid ee loogu talagalay gobolka Oregon oo dhan, kaasi oo loogu yeero Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP).

**Health Share of Oregon (HSO)** waa waxa loo yaqaano daryeelka urruradu iska kaashadeen (CCO). Health Share of Oregon waxay ka hoos shaqeysaa OHA si ay ugu adeegto xubnaha ka tirsan OHP ee ku nool degaanka saddexda-magaalo ka kooban.

**CareOregon** waa mid ka mid ah dhowr bixiyayaasha caafimaadka oo ku yaala degaanka saddexda-magaalo ka kooban oo Health Share CCO ka caawiya in ay bixiso daryeel. Waaan sidoo kale gacan ka geysanaa faa'iidooyinka daryeelka caafimaad iyo adeegyada ee loogu talagalay xubnaheena.

**Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP)** wuxuu noqon karaa dhakhtar, kalkaaliso sare, kalkaaliyaha dhakhtarta ama daaweynta bedelka ah 'naturopath'. Waxay isku duwaan daryeelkaaga aad la leedahay CareOregon iyo xubnaha kale ee kooxda caafimaadka sida dhakaatiirta ilkaha, bixiyayaasha daryeelka caafimaadka maskaxda, farmashiiyayaasha iyo kuwo kale.

#### **CareOregon waxay bixisaa adeegyada kuwan oo kale ah ee loogu talagalay xubnaha Medicaid (OHP):**

- ▶ Daryeelka caafimaadka jirka
- ▶ Daryeelka caafimaadka dhimirka
- ▶ Daaweynta isticmaalka mukhaadaraadka
- ▶ Daryeelka ilkaha
- ▶ Medicare la sii marayo CareOregon Advantage
- ▶ Daryeelka bukaanka hospice ama daaweynta oo la adeegsanayo Bixiyayaasha Housecall

Waxaad heli kartaa tani oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan.

Caawimaadani waa mid lacag la'aan ah. Wac 800-224-4840 ama TTY 711. Waan aqbalnaa wicitaanada gudbinta.

[careoregon.org](http://careoregon.org)



#### **Waxaad sidoo kale awoodi doontaa in aad isticmaasho adeegyo muhiim ah sida kuwani oo kale:**

- ▶ Isku duwida daryeelka
- ▶ Farmashiyaha
- ▶ Daryeelka dhalashada ilmaha ka hor iyo daryeelka dhallaanka
- ▶ Kala doorashada gaadiidka
- ▶ Adeegyada turjumaada luqadda
- ▶ ER iyo daryeelka degdega ah



CareOregon®